# SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1044
# THE EPISTLE OF APOSTLE PETER
# CHAPTER 4:2-6.

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin. Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maanta nool, ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay, sida ku qoran isla Warqaddan kowaad cutubka 4:1, baalka 408 ee Axdiga Cusub, sidatan: **"Mar haddii Masiixu jidhka ku xanuunsaday, idinkuna sidaas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku maan ah; maxaa yeelay, kii jidhka ku xanuunsaday waa ka joogsaday dembiga."**

**SONG: REEL----CUT--------**

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay bilowga cutubka afraad, waxaanan idiin kala dhignay cutubka 4aad aayaddiisa kowaad. Dad badan ayaa siyaabo khaldan Ilaah uga hadlaa oo qaarkoodna waxayba qoreen buugaag ay figradahooda naxliga ah ku soo ban-dhigayaan; waxaanay ku jaa'ifeeyaan magaca Rabbiga oo qoduuska ah. Figradahood awaxaa ka mid ah Ilaah ma jiro, ama wuu tegay iyo wax la mid ah. Haddaba Ilaah ma jirrado, mana tago, laakiin wuu joogaa, waana baaqi. Waxaan dhintay, balse la sarakiciyey Ciise Masiix.

Isagu wuxuu ku dhintay jidhkiisii banii'aadanka ahaa, laakiin kolkii dambe wuu sara-kacay oo wuxuu fariistay midigta weynaha samooyinka ku jira. Markaa ay sidaas tahay Masiixu wuu dhintay, markii uu joogay Beytlaxam, laakiinse dhimashadu ma loodin karin. Waxaana qoraha Warqaddii Cibraaniyada uu leeyahay: **"Waxaa isaga loo jirrabay sideenna oo kale."**

Wuxuu garanayey waxa ay ka macne tahay dhiig-daadinta, wuxuu kaloo garanayey waxa ay ka macne tahay oohintaa ma uur-dabacsanaanta. Wuxuu ahaa nin ama qof caadi ah, wuxuuna Masiixu ku hdintay jidhkiisii caadiga ahaa. Masiixa wuxuu soo gabagabeeyey dembiyadii dadka, oo waxaa la helay qaab Ilaah loogu adeego ama aado. Masiixu wuxuu jidhkiisii iskutallaabta saarnaa ku bixiyey dembiyadeennii.

Waxaana laynoogu soo sheegay cutubka 2:24 ee isla Warqaddan rasuul Butros, markaasoo uu lahaa:

**"Oo isaga dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii**

**geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen xarriijimihii karbaashiddiisa."**

Wuxuu arrinkaas isaga ah rasuulku ku soo celcelinayaa saddex goor. Mar kale ayuu wuxuu leeyahay sida ku qoran 3:18, oo leh sidatan:

**"Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyada, Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah."**

Weli wuxuu adkaynayaa rasuulku ahmiyadda ay leedahay in Masiixu iskutallaabta inoogu dhinto, wuxuuna leeyahay sida ku qoran 4:1, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Mar haddii Masiixu jidhka ku xanuunsaday, idinkuna sidaas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku maan ah; maxaa yeelay, kii jidhka ku xanuunsaday waa ka joogsaday dembiga."**

Waxaa Butros imminka leeyahay waa dhiiggiisa iyo jidhkiisa waxa Masiixu ku bixiyey ciqaabtii ay lahaayeen dadka. Haddaba Masiixu dembi kuma dhiman welibana dembi kuma hoos dhiman, balse dembiga ayuu u dhintay, oo wuxuu noqday dembi. Wuxuu qaaday booskaaga, iyo kayga oo wuxuuna bixiyey ciqaabtii dembiyadeenna.

Isagu wax xiriir ah lama leh dembi, oo inkastoo uu dembiyada u dhintay, haddana wuxuu ka sara-kacay dhimashadii. Markii uu dhimashadii ka sara-kacay waxaa lagu sarakiciyey jidh ammaanan. Waxaana nolol uu ku helay Ruuxa Quduuks sh. Masiixu waa saydkeenna waana Wiilkii Ilaah, oo isagu weligii wuu nool yahay. Waxaa rasuul Butros haddaba inoogu sheegayaa isla aayaddan kowaad inaynu iku maan ahaano ama isku

fikir., waana talo la mid ah tii rasuul Bawlos sida ku qoran Warqaddii reer Filiboy 2:5, markaasoo Bawlos lahaa:

**"Fikirkaas oo Ciise Masiix ku jiray, idinkana ha idinku jiro."**

Waxaa Butros inta inoogu sheegayaa in Masiixu silcay, oo mid waliba oo silic iyo rafaad arkaana, wuxuu ka gaabiyaa dembiga. Giriig ahaan erayga uu isticmaalay waxaa weeye: **"pauo."** Waa isla eraygii rasuul Bawlos isticmaalay markii uu la hadlayey reer Korintos sida ku qoran Warqaddii kowaad ee reer Korintos 13:8, markaasoo uu lahaa:

**"Jacaylku weligii ma idlaado. Hadday waxsheegidi jirto way baabi'i doontaa, hadday afaf jiraan way dhammaan doonaan, haddii aqooni jirto way baabi'i doontaa."** Inkastoo halkan rasuul Bawlos isticmaalay dhammaansho ayaa haddana macne ahaan ay ka dhigan tayhay wax istaagi doona. Waxaana culimada kitaabku ay ku macnaynayaan aayaddan ina hor-taalla, haddii qofku xagga jidhka wax badan ka silco, inay dembi kala tegayaan. Haddaba muxuu Butros taag uga gol leeyahay?

Wuxuu ula jeedaa in markii qofku silco, silicu uu ka imanayo dhagnka Ilaah, si qofka iyo dembigu ay u kala tagaan. Waxaan rumaysanahay in kuwo badan ay dareemeen khibrad ahaan marxaladahaas iyaga ah. Markii dhib ina soo gaaro waxay hor-marinaysaa nolosha qofka Msiixiga ah oo wuxuu baranayaa inuu Ilaah wax waliba ugu kalsoonaado.

Waayo waxaa qofka ku dhici kara dhibaatooyin aan fududayn, oo uusan isagu iska rogi karin. Wuxuu markaa baranayaa in dhibaatooyinka nolosha uu Ilaah

u daayo, iyaguna way dhaafayaan, oo siima raagi doonaan. Isla sidii rasuul Bawlos kaga hadlay cutubka lixaad, ayaa imminkana rasuul Butros hal aayad oo qura kaga hadlayaa wixii rasuul Bawlos cutub dhan kaga hadlay.

Cutubka lixaad ee Warqaddii rasuul Bawlos u qoray reer Rooma wuxuu kaga hadlay waxyaabaha Ilaah u diyaariyey qofka Masiixiga ah si uu ku helo nolol masiixinnimo. Butros wuu caddeeyey inaannu mar kale ka dhalannay Hadallada Ilaah. Haddaba Ruuxa Ilaah haddii uu isticmaalo ama qaado Hadallada Ilaah waxaa halkaas ka soo baxaya qof Ilaah ka cabsada.

Qofkaas Ilaah ka cabsadana wuxuu leeyahay ama haystaa dabiicad cusub, waa dabiicad cusub oo aadan yeelayn in kol dabeeto aad dembi ku noolaato. Waxaana sharraxaad ama tusaale aan u soo qaadan karnaa wixii ku dhacay **wiilkii wixiisii khasaariyey** sida ku qoran injiilka sida Luukos u qoray 15:11-32. Waxaan garanaynaa wixii wiilkii wixiisii khasaariyey ka qabsaday xeradii doofaarradaha halkaasoo uu doofaarrada kula cuni jiray buunshaha, kaddib markii uu wixiisii tumasho ku dhammeeyey. Waxaa imminka rasuul butros inoo sheegayaa in laynagu shaabbadeeyey Masiixa.

Markii aad imminka u timaaddo Masiixa, oo aad mar kale dhalato, waxaa laguugu makhuurinayaa Ruuxa Ilaah, waxaana laguugu makhuurinayaa Masiixa, wuxuna Ruuxu kuugu xirayaa Masiixa. Masiixu wuxuu imminka la fadhiyaa Ilaah xagga sare. Haddaba saaxiib marba haddii lagu siiyey ruux cusub, oo aad yeelatay dabiicad cusub, oo Ilaah laguugu soo xiray, ma waxay kula tahay in aad sii wadi karto inaad

dembaabto? Waxaan anigu adkaynayaa inay tahay in loo baahan yahay in qofka Masiixiga ah ay u sugan tahay badbaadadiisa, iyadoo uu hoggaaminayo Ruuxa Qoduuska ah. Balse waa inuu jeclaysto caanaha saafiga ah ee Ruuxa. Waxaa jira ururro adkaynaya in qofka masiixiga ah isla markii uu masiixi noqdaba uu ku noolaado nolol qoduus ah.

Waxaana taas inoo suuragelinaya Ilaah marka xiisadaha iyo marxaladaha darani ina soo food saaraan. Waa marka aynu baranayno inaynu gebi ahaan Ilaah isku dhiibno. Waana marka aynu bilaabayno inaan wax waliba Ilaah ugu kalsoonaanno inta aan ku jirno hayaanka nolosha masiixinnimada. Welibana maahan in qofku uu ku jiro ama ku sii jiro nolol dulli ah oo kharriban isagoo afka ka sheeganaya inuu Masiixi yahay.

Waxaa la doonayaa inaad ku beddelanto cusboonaanta Ruuxa, oo aadan ka cararin caanaha saafiga ah ee ruuxa, waana hadallada Ilaah. Waxaa ku hagaya Hadallada Ilaah ee kuugu qoran kitaabka Qoduuska ah ee Baybalka. Maaddaama anigu aan rumaysanahay ammaanka rumaystaha ayaa waxaa ila wanaagsan in qofka Masiixiga ah dhug u yeesho kitaabka waayo waa halkaas meesha uu ka helayo hubaasha rumaysadkiisa. Butros wuxuu inoo soo sheegay, inaynu mar kale dhalannay, oo ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah inagu jiro, oo laynagu makhuuriyey Ruuxa. Welibana waxaa laynagu shaabbadeeyey Masiixa, iyo inaynu ku noolaanayno awoodda Ruuxa Qoduusak ah. Waxaa laynoogu sheegayaa cutubka toddobaad ee Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Rooma ayaa Bawlos inoo muujinayaa sida masiixiyiintu u dhacayaan

markii ay jidhka ku socdaan. Maraa in Ruua lagu socdo waxay keenaysaa in qofka masiixiga ah aanu luminin noloshiisa masiixinnimo. Waana in qofku istaajiyo ku noolaanshaha jidhka. Haddaba waa maxay ku noolaanshaha jidhka? Ku-noolaanshaha jidhka waxay keenaysaa sino, iyo wasakhinimo, iyo dirir, iyo kala qaybsanaan, iyo wax kasta ee qofka ridi kara.

Miraha Ruuxuna waa jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan, wanaag, aaminnimo, qabownimo, iyo is-celin. Qofkii ku nool jidhka, wuxuu ku dambaynayaa xerada doofaarrada, laakiin qofkii masiixi ah ee inta baadiyooba gala xerada doofaarrada, wuxuu mar waliba xusuusanayaa hooygii wacnaa ee Aabbihiis. wuxuuna gaarayaa go'aan la mid ah kii uu gaaray Wiilkii wixiisii khasaariyey.

Wuxuu oranayaa, Haatan waa kici, oo aabbahay baan u tegi, oo isaguna wuu ii dhaami doonaa xerada doofaarrada. Waxaa taasu ka macne tahay haddii aad tahay nin muumin ah oo Masiixa raacsan, oo haddana aad khalad samayso, ku sii jiri maysid khaladka. Waayo waxaad tebaysaa qoduusnimadii noloshaada, taasoo aad ku heshay xaqnimada Masiixa.

Waxaa markaa haddaba rumaystayaasha ku jooga tubta Ilaah iyagana laga doonayaa inay wax badan akhristaan Hadallada Ilaah, waayo waa iyaga keliya kuwa inoo soora-gelinaya nolosha masiixinnimo. Nolosha masiixinnimada kuma taabbagelin kartid sharciyo iyo xeerar, waxaase nolosha masiixinnimada ku socodsiin kartaa inaad yeelato maanka Masiixa. Waana inaad lahaato Ruuxa Qoduuska ah si aad Ilaah uga farxiso, oo kaga istaagto wax kasta ee ceeb iyo fashaxaar u keeni kara Masiixa, waayo adigu waxaad

ku badbaadda nimco xagga rumaysadka Masiixa kuugu timid. Haddaan intaas kaga baxno faalladii dheerayd ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 2aad, ee isla cutubka 4aad, baalka 408 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Si wakhtiga idiin hadhay oo aad jidhka ku nooshihiin aydnaan damacyada dadka mar dambe ugu noolaan laakiinse aad ugu noolaataan doonista Ilaah."**

Haatan waxa rasuul Butros halkan uga hadlayo ayaa rasuul Bawlosna uga hadlay sida ku qoran Warqaddiisii reer Rooma 8:5-6, markaasoo rasuul Bawlos lahaa:

**"Waayo, kuwa sida jidhka u socdaa, waxay ka fikiraan waxyaalaha jidhka, laakiinse kuwa sida Ruuxa u socdaa, waxay ka fikiraan waxyaalaha Ruuxa. Jidhka kafikiriddiisu waa dhimashada, laakiinse Ruuxa kafakariddiisu waa nolosha iyo nabadda."**

Muxuu haddaba rasuul Bawlos uga gol lahaa markii uu lahaa: **"jidhka kafikiriddiisu waa dhimashada?"** Ma wuxuu ula jeedaa inaynu luminayno nabaadiinadeenna haddii aynu jidhka ka fakarno? Maya taas ulama jeedo, waxaase loo jeedaa in aadan Ilaah wehel la ahaan doonin haddaad ka mid tahay kuwa jidhka ka fakra. Waxaa rasuul Yooxanaa qudhiisu inoo faahfaahinayaa isla arrinkaas marka uu leeyahay sida ku qoran warqaddii kowaad ee rasuul Yooxanaa 1:6, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

**"Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno."** Waxaa taasu marag cad

ka tahay inaadan oran karin nolol dembi leh ayaan ku noolaanayaa, oo haddana Ilaah baa wehel la sii ahaanayaa. Haddaba si kale oo qofku nolosha Masiixinnimada uu ugu noolaan karo ma lahan, haddaanay ahayn inuu ku noolaado eray waliba oo Ilaah ka yimid.

Waana kan laynoogu qoray kitaabka qoduuska ah kaasaana ina gaarsiinaya nolol taam ah. Wuxuuna rasuulku ina hoga-tusaalaynayaa in Ilaah soo dhex gelayo nolosheenna oo silic, iyo marxalado adag aynu gelayno, kuwaasoo Ilaah raalli ka noqonayo, si aaminnimadii aynu Ilaah ku qabnay u badato, oo dembiyada aynu gelaynana u istaagaan. Waayo kuwo badan oo innaga ah markii ay nolol wanaagsan galaan, oo maalna helaan, waxay illoobaan Ilaah. Markaas ayaa Ilaah noloshayada u oggolaanayaa in la dhibaateeyo, si aynu Ilaah ugu soo noqonno, oo kaga istaagno dembiga. Rasuul Butrosna wuxuu leeyahay:

**"Si wakhtiga idiin hadhay oo aad jidhka ku nooshihiin aydnaan damacyada dadka mar dambe ugu noolaan, laakiinse aad ugu noolaataan doonista Ilaah."**

Haddaan meeriska cutubkan 4aad dib ugu noqonno, ayaannu dhegaystayaal imminkana idiin kahriyeynaa aayadda 3aad ee cutubka kowaad ee warqaddii rasuul Butros 4:3, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, waxaa idinku filan wakhtigii hore oo aad doonista dadka aan Ilaah aaminin samayn jirteen, markii aad ku socon jirteen nejisnimo, iyo damacyadii jidhka, iyo sakhraannimo iyo rabsho, iyo khamricabbid, iyo sanam-caabudid xaaraan ah."**

Marka ay sidan tahay dhegyaste, waxaa laynoo

xaqiijinayaa marba haddii layna beddelay inaynaan nacasyo noqon, oo aan dib loogu laaban waxyaalihii hore. Haddii aynu masiixiyiin khaalis ah nahay, taas ma samayn doonno, waayo waxaa laynagu xiray Masiixa, oo isaga ayeynu la midownay, oo kol dambeeto dunida la dembaabi mayno. Marka uu leeyahay,
**"...markii aad ku socon jirteen nejisnimo, iyo damacyadii jidhka, iyo sakhraannimo, iyo rabsho, iyo kamricabbid, iyo sanamcaabudid xaaraan ah, "** ayaa rasuul Butros wuxuu daboolka ka qaadayaa dembiyadii dadkii waagaas samayn jireen, kuwaasoo weli dadka dunida ee maanta ay samaynayaan. Wadaaddada caanka ah ee dalka Maraykanka, waxay had iyo jeer diiradda saari ireen dembiga.
Rasuul Butros wuxuu xoogga saarayaa dembiga, oo uu dadka u macnaynayo haatan. Nejisnimada uu ka hadlayana waxaa weeye tan qofku ku noolaanayo dembiga. Damacyada jidhkuna waa in qofku aad iyo aad isugu dhiibo waxyaabaha jidhka ka farxiya, kuwaasoo Bawlos yiri, waxay keenaan dhimasho, waana dhimashada Ruuxa. Waxaad arkaysaa dad badan oo ku sacsacay qaadka. Wax kale uma noola ayaad is-leedahay, waayo ilmo iyo xaas iyo qaraabo beri hore ayey kala tageen. Wuxuu u nool yahay marqaanka iyo sidii maalintaas loo miisan lahaa qaad fara badan oo dadka lagu caayo. Ilaah kamaba hadlaan, haddii ay ka hadli lahaayeenna waxba kama yaqaannaan.
Haddaba waa in dadka lagala hadlo waxyaabaha ku saabsan dunuubta iyo sida ay qofka u addoonsadaan. Sayid Ciise Masiix oo garanaya waxa dembigu yahay ayaa mar wuxuu yiri, **"Ninkii dembi sameeya waa**

**addoonka dembiga."** Waa isla dembiga qofku uu gelayo kan addoonsanaya. Haddii dunuubta aad isku dhiibtay uu yahay, sino, hiwaayad, ama khamri-cabbis, ama qaad, kollayba dembiga aad gelayso ayaa ku gumaysanaya.

Markaa waa in aafada dembiga lagala hadlo dadka. Weli waxaannu ku jirnaa dhegaystayaal meeriska cutubka 4aad, waxaanan imminka idiin akhriyeynaa aayadda 4, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo markii aydnaan iyaga u raacin nijisnimadaas badan, way idinla yaabaan oo way idin caayaan."**

Waxaan markaa idiin sheegayaa haddii aadan dadka ka farxinaynin, waxaad ka farxinaysaan Ilaah. Haddiise aad dadka ka farxinaysaan oo waxay doonayaan aad samaysaan, Ilaah baad ka caraysiinaysaan. Ciise Masiix oo garashadaas sare ee aadmiga lahaa ayaa wuxuu yiri, **"...Haddii dunidu idin nebcaato, waad garanaysaan inay aniga hortiin i nebcaatay."**

Waxaana taasu ku qoran tahay Injiilka sida Yooanaa u qoray 15:18. Haddaba haddii dunidu ayan idin nebcayn, waxbaa kaa khaldan saaxiib. Dunidu waa inay ku nebcaato markii aad Masiixa u istaagto, waayo waxaa kuu soo if-baxaya dhibaatada nolosha aan Ilaah iyo masiixiisa aan la rumaysanaynin leedahay.

Haddaba saaxiib anigu ma rumaysni inaad dembi ku sii soconayso haddii aad tahay mid ka mid ah muuminiinta Ilaah. Mar buu halkan ku dhibtooday, mar dambena Masiixu dembiyo dhiiggiisa uma bixin doono. Waayo hal mar buu bixiyey allabbaryadii dembiga. Adiguna isaga ayaa laguugu xiriiriyey, oo waxaad yeelatay dabiicaddii Masiixa. Wuxuu Ruuxiisa qoduuska ah u soo diray kuwiisa, waxaana lagu makhuuriyey Ruuxa

Qoduuska ah isla sida Butros uu inoo dul maray, waxaana masiixiyiinta laga buuxiyey Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Marka ay sidaas tahay, miyaannaan u noolaan karin Masiixa? Waxaannu haddaba taas ku samayn karnaa xooggeenna, oo ah xoogga uu ina siiyey. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 4aad ee Warqaddan kowaad ee rasuul Butros ayaannu dhegaystayaal imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 5aad, baalka 409 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Iyagu waxay faleen waxay kala xisaabtami doonaan kan diyaarka u ah inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba."**

Waxaa rasuulka oo ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo leeyahay: **"Kan diyaarka u ah inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba."** Haddaba kuwa dhintayba maalin maalmaha ka mid ah waxaa xukumi doona Sayid Ciise Masiix. Weliba kuwa rumaystayaasha ah ayaa lala xisaabtami doonaa. Balse maahan waxa lagala xisaabtamayo badbaadadoodii, laakiinse waxaa lagala xisaabtami doonaa waxyaabihii khaladka ahaa ee ay sameeyeen, haddii uu jiro wax khalad ah ee ay sameeyeen.

Markaa haddii masiixyiintii lala xisaabtamayo, maxaa kan aan masiixiga ahayn ku dhacaya? Halkan ayaa loogu digayaa oo waxaa loo sii sheegayaa in xukun uu sugayo. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaysatyaal meeriska ayaannu imminka idiin akhriyeynaa 4:6, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, taas aawadeed injiilka waxaa lagu wacdiyey xataa kuwii dhintay in iyaga jidhka lagu xukumo sida**

**dadka, laakiinse ay ruuxa ku noolaadaan sida Ilaah."** Marka uu leeyahay rasuulku, **"Taas aawdeed"** ayuu ka hadlayaa ciqaabta aayaddii shanaad lagu soo sheegay, taasoo horey loogu wacdiyey dadka Injiillada. Ilaah wuxuu doonayaa in dadka lagu wacdiyo Injiilka, oo loo xaqiijiyo inay xad-gudubyadooda iyo dembiyadooda horey ugu dhinteen., oo welibana jidhka lagu imtixaami doono. Ha yeeshee haddii ay Masiixa soo raacaan, waxay u noolaanayaa si waafaqsan doonista Ilaah, oo waxay ku soconayaan Ruuxa. Waxaa intaas ku eg haddaba barnaamijkeennii caaway habeenka xiga ayaannu waxbaridda halkii idiinka siiw adaynaa. Haatanse aynu wada-dhegaysanno qasaa'id ay inoogu luuqeeyaan culimo Masiixiyiin ah.

**SONG: REEL----CUT-------**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare

iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin